

## **Ka hortagga Handadka iyo Handaada Interneetka Dugsiyada**

### **I. Hordhac**

Waa yoolkeena in dugsiigeena ama dugsiyadeena ahaadan deegan waxbarasho oo amaan iyo badqab u leh dhamaan ardada. Waa ujeedka [\_\_\_\_\_]

Magaca Maamulka Qaybta Dugsiga

Gudiga in la siiyo dhamaan ardada fursad waxbarasho oo sinaan leh. Sidaa awgeed, Gudigu muhiimad xiisa leh ayey u tahay in deegaanka dugsiga yahay mid xushmad leh, ammaan leh, nidaamsan oo sahal u ah baritaanka iyo barashada.

Handaada iyo qaybaha kale oo hab dhaqan xummadda ardada iskufilka dhexdooda ah waxay dhaawac ku yihiin deegaanka dugsiga sido kale waxbarashada, guusha iyo faydada qabka gardayga. Xadgudubka ardada asxaabta dhexdooda wuxuu farageliyaa howlaha ee waxbarista ardaydooda wuxuuna isla markaa carqaladeeya shaqada dugsiyada. Hadadaada iyo noocyada kale ee hab dhaqan xummada ardada dhexdooda ma saameeyso ardada la beegsanaya oo kali ah balse waxay sido kale saameysa kuwa ka qaybgalaya iyo kuwa markhaatiga ka ah anshaxa nocaas ah. Waa in laga hadlaa anshaxa xun si loo hubyo badqabka ardayga iyo degaan waxbarasho oo loo dhanyahay.

Ma ahan ujeedka Guddiga inuu ka mamnuuco ardayda soo bandhigidda afkaartooda, ay ka mid tahay afkaarta xumayn karto dareenka kuwa kale, ama joojinta ka qaybgalka dooda sokeeye. Si kastaba ha ahaatee, Guddiga ma saamaxayo wuuna qaadaya talaabo uu kaga jawaabayo dhaqanka faragelinya fursada waxbarasho ee ardayga, hadafka tacliinta ee [Magaca Dugsiga] dugsiyadda, iyo howlaha shaqo ee dugsiyadda.

### **II. Dhaqanka Mamnuuca ah**

Dhaqannada soo socda waa mamnuuc:

1. Handad;
2. Handaada intarneetka;
3. Dhibaatayn iyo Faraxumayn Galmo (sida ku qeexan qanuunka guddiga ACAA);
4. Aargosiga kuwa soo sheega dhaqanka ku sharxan qanuunka guddiga; iyo
5. Samaynta eedeymo been ah ee handadka.

Qofkii lug ku yeesha dhaqannadan mamnuuca ah ee noqonaya xoogsheegasha waxaa la tiigsanaya idbinta ku haboon.

### **III. Handadka iyo Handaada Intarneetka la Qeexay**

“Handadka” iyo “Handaada Intarneetka” waa isku micno gudaha qaanunkan sida sharciga Maine.

A. “Handaada” waxa qayb ka ah, laakin aan ku xadidnayn, qoraal, af ama hadal elektroonik ama xoog ama meedaar ama isku dar taas oo lala beegsado arday ama arday kaas oo:

- (1) Leh, ama qofka macquulka filan karo inuu la kulmo saameynta ah:
  - (a) Waxyeelen jirka ardayga ama dhaawacaya ardayga hantidiisa; ama

Waaxda Waxbarashada Gobolka Maine  
Fal lagu Mamnuucayo Handadka iyo Handaaada Intarneetka Dugsiyada Maine  
Model Policy - JICK

- (b) Galinneyso ardayga cabsi macquul ah oo dhibaateynaysa jirkiisa ama dhaawaceyso hantidiisa;

**AMA**

- (2) Faragelinaysa xuquuqda ardayga iyadoo:

(a) U abuurista ardayga deegaanka waxbarasho oo leh cabsi iyo colaad ama

(b) Faragelinta ardayga kartidiisa tacliin ama awooda ka qaygalka am ka fa'ideysiga addeegyada, howlaha ama mudnaanta dugsiga bixiyo;

**AMA**

(3) Ah mid ku salaysan qoomiyadda dhabta ee ardayga ama loo gartay, midabka, asal qaran, isirka, diinta, naafo dhanka muruqa ama maskaxda, jinsiyada, nooca galmo, ama dabecadaha soocaaya, ama ah mid ku salaysan la socodka ardayga qof leh mid ama ka badan dabecadaha oo dhab ah ama loo garto lehna saamaynta ku tilmaaman farqadaha cutubka (1) ama (2) ee kore. (Dabecadahan waxay sidoo kale laga yabaa inay waafaqaan shuruudaha dhibaateynta sida ku sharxan qanuunka guddiga ACAA: Dhibaateynta iyo Faraxumaynta Galmada ee Ardayda.)

Tusaalooyinka dabecadaha noqon kara handaad waxa ka mid ah, laakin aan ku xadadnayn:

1. Cayda soo noqnoqota ama joogtada, magac xun yeerista, liidista, jees-jeeska, yasitaanka, ama kaftanka baidilka ah;
2. Dabecad ay suuragal tahay inay dhibaateyso qof ama waxyeelayso ama lagu kontoroola xiriirka qof la leeyahay dadka kale, ay ka mid tahay balse ku xadadnayn xan, faafinta war aan jirin, iyo ka saarida bulshada;
3. Hanjabaadaha aan af ahayn/ama cabsi gelinta ay ka mid tahay isticmaal digaal, daandaansi ama meedar xushmo daro ah;
4. Hanjabaadyaha lagu dhibaateeyo ardayga, wixiisa, shaqsiyaadka kale, ha lagu soo gudbiyo af ama qoraal;
5. Hanjabaad, baad, dalbasho lacag si magan u helo, ama deen ama deeq bixin ikhtiyaar la'aan ah;
6. Xayiris helitaanka hantida dugsiga ama xarumaha;
7. Xadida ama qarinta buugaagta, shandadaha iyo waxyaabaha kale ee la leeyahay;
8. Dabagalka; iyo
9. Jir taabasho ama waxyeleen qof kale ama hantidiisa.

B. "Handaada Intarneetka" micnaheedu waxaa weeyan handadaad lagu geeysta isticmaalka tignoolojiyada ama wax walbo oo xiriir elektroonic ah, oo ay ka mid tahay balse aan ku xadadnayn, kala xawilka calamadaha, qoraalada, sawirada, codadka, macluumaadka ama siraha nooca ay ahaandanba ee lagu gudbiyo isticmaalka aalad elektroonik oo ay ka mid tahay balse ku xadadnayn, koombuyuutar, taleefon, taleefoonka gacanka, aaladaha fariimaha lagu diro ama qalab kaaliya oo shaqsiga isticmaalo.

Tusaaloyinka dabecadaha noqon kara handaada intarneetka ka dhacda waxaa ka mid ah, basle aan ku xadadnayn ficiladaan soo socda ee lagu sameeyo isgaarsiinta elektroonikada:

Waaxda Waxbarashada Gobolka Maine  
Fal lagu Mamnuucayo Handadka iyo Handaada Intarneetka Dugsiyada Maine  
Model Policy - JICK

1. Daabicida cayda ama xanta, ama soo bandiggida waxyaabaha sumcad dilka, aan sax ahan, liidista, qas, xadgudub, xushmad daro, ama ku dabicidda webseyt, app, baraha bulshada, ama isticmaalada kale ee elektroonikada wax sal ku leh galmada ardayga;
2. Daabicista marin habaabin ama sawiro been abuur ah ama fiidiyow oo ardayga loo soo geliyo webseyt ama sameynta webseyt been ah ama baraha kulanka bulshada oo muqaal lagu sameeyo iyadoo lagu gabanaya ardayga la beegsanaya;
3. Iska dhigid ama mataalada arday kale iyadoo loo marayo isticmaalka aalada elektrooniga ee arday kale leeyahy ama koontadiisa si *email* loo diro, fariima qoraal, fariimaha degdega (IM), wicitaan talefoon ama fariimaha kale ee lagu gudbiyo baraha bulshada;
4. Dirista fariin *email*, fariin qoraal, IM, ama fariimo cod ah oo xun ama hanjabaad ah, amaa aad si xad dhaaf ubadan buux dhaafiyana emailka qofka loo dirayo, koontada IM, ama talefoonkiisa gancanta; iyo
5. Isticmaalka kameerada talefoonka ama tan caadiga si loo qaado/ ama loo diro sawiro ceebayn ah ama qaawan ee ardada kale.

C. “Aargoosi” micnaheedu waa fal ama meedar ka dhan ah arday soo caddeeyey ama ku soo eedeeyey arday kale fal handed ah. “Aargoosi” waxaa sidoo kale ka mid ah in qof been uu ogyahay soo sheego isagoo eetamaya in handed lagu sameeyey.

D. “Substantiated” micnaheedu waxa weeyan natajooyinka kaso baxo dabagalka foomka loogu magac daray *Responding Form* (JICK-E2) inay xaqiijiyeen cadeymo tusaya in handad ama hadadaada intarneetka, sida ku sharxan qanuunka, ay dhacday.

E. “Anshax edbin kale” micnaheedu waxaa weeyan fal idbin oo aan aheyn ganaax ama ka erin dugsiiga taas oo looga gol leeyahay in lagu saxo ama looga hadlo waxa salka u ah dabeecadaha gaarka anshax xumada ardayga iyadoo isla markaa lagu reebayo ardayga fasalka ama dugsiiga, ama kuso celinta dhaqanka dugsiiga si loo bogsiiyo dhibatada ku timid xiriirada iyo bogsiinta dadyoowga kale ee ay saamaynta ku yeelatay ansha xummada ardayga.

#### **IV. Isticmaalka Qanuunka**

A. Qanuunkan wuxuu khuseeya arday walbo, shaqaalaha dugsi, qandaraasle, martida iyo iskood wax u qabtayaasha lug ku yeesha dabeecadaha ka dhasha handaada ama aargoosiga, kuwaas oo dhamantood mas’uuliyad ka saarantahay inay u hogaansamaan qanuunka.

B. Qanuunkan wuxuu khuseeya handaada:

1. Ka dhacda dugsiiga ama dhulalka dugsiiga, micnaha: dismaha dugsiiga; dhulka dugsiiga ku dhisanyahay ama qololaha ku yaalan; ama hanti la leeyahay, mid la ijaaray ama dugsiiga u isticmaalo howlo dugsiiga ogolyahay, xaflad, barnaamij, waxbarasho ama tababar. “Dhulalka dugsiiga” waxaa sido kale ka mid ah gaadiidka baaburta ee dugsiiga u shaqeeya.
2. Dhacda goorta ardada gadiidka u qaadayo ama kaso celinaayo dugsiiga ama la geeynaya dhacdooyinka dugsiiga marti geliyey;
3. Ka dhacda meelaha dhacdada dugsiiga marti geliyey, howsha, xaflada, barnamijka, waxbarashada ama tababarka; ama

4. Ka dhacda goob kale ama isticmaalka tignoolojida laakin waa haddii ay handadaatu sido kale xadgudub ku noqoneyso xuquuda ardayga dugsiga dhexdiisa sida ku sharxan qaanunkan handaada.

## **V. Warbixinta**

### *Tixraac Foomka Warbixinta – JICK-E1*

Handadka ama waxa loo tuhmo handadaad waa in si shaqi ama qoraal ah (ka mid tahay qarsoodi) logu soo sheegaa shaqaalaha dugsiga.

A. Shaqaale dugsiga, tababare iyo la taliyayaasha howlaha ka baxsan xiliga waxbarashada waxaa looga baahanyahay inay soo sheegan eedeymaha dhacdooyinka handaada oo ay u soo gudbiyaan maamulaha dugsiga ama shaqaalaha dugsiga ee kormeeraha waxbarashada arimahaas u xil saaray. Dadka kale oo shaqaalaha dugsiga ama iskood wax u qabta waxaa lagu dhiirigelinaya inay u soo sheegaan maamulaha dhismaha dugsiga ama shaqaalaha kormeeraha waxabarasha u xil saaray falalka ay u arkaan ama ay tuhmaan dhacdooyinka eedeymaha handaada.

B. Ardada la rumeysanyahay in handaad lagu sameeyey ama ka war qabo dhacdooyinka handaada waxaa si xoog leh loogu dhiirigelinayaa inay u soo sheegan shaqaalaha dugsiga ama maamulaha dugsiga dabecadahan.

C. Waalidka iyo dadka waaweyn ee rumeysan inay dhaceen dabecado handaada ah waxaa lagu dhiirigelinayaa inay u soo sheegan shaqaale ka tirsan ama maamulaha dugsiga.

D. Falalka rogaal celinta ama aargoosiga ku wajahan qofka warbixinta dhacdooyinka eedeymaha handaada soo sheega waa mamnuuc. Arday kasta oo lagu helo so gudbinta been cad oo uu ogsoonyahay inuu arday kale handaday ciqaab edbin ayuu mudan doona.

## **VI. Jawaab**

### *Tixraac Foomka Jawaab Celinta – JICK-E2*

Maamulaha dugsiga ama shaqaalaha kormeeraha dugsiga u xil saaray aya:

A. Si dhakso ah [AMA: \_\_\_\_ maalmo guduhooda] u baaridoona oo jawaab ka bixindoona eedeymaha dabecadaha handaada;

B. Xifdi dukumiintiga qoraallada dhamaan dabecadaha eedeymhaha handaada iyo natiijoyinka baaritaanada, eena wargeli kormeeraha waxbarashada dhacdooyinka eedeymaha la taaban karo.

C. Wargeli waalidka ama mas'uulka ardayga ama ardayda lagu soo eedeyey handadka IYO waalidka ama mas'uulka ardayga ama ardayda la rumeysanyaha in la handaday in dhacdada la soo gudbiyey;

D. La xiriir waalidka ama mas'uulka ardayga ama ardada la rumeysanyahay in la handaday tilaabooyinka lagu hubinaayo badqabka ardayga la rumeysanyahay in la handaday iyo ka hortagga falalka handadaad kale;

E. Wargeli waalidka ama mas'uulka ardayda ku lug leh natiijooyinka baaritaanka iyo talaabooyinka la qaadayo;

F. La xiriir hay'adaha maxaliga ah ama kuwa sharci fulinta gobolka haddii la rumeysanyahay inay haboontahay dabagal danbi kusoo ogis ama ficil madani ah sida Xuquuqda Madaniga ee Maine ay qabto.

## **VII. Xalinta**

*Tixraac Foomka Xalinta – JICK-E3*

Maamulaha dugsiga ama shaqaalaha kormeeraha waxbarashada u xil saaray ayaa:

A. Aqoonsan doona nooca gaarka dhacdada ama dhacdooyinka.

B. Isticmaal talaabooyinka edbinta, kuwaas oo ay ka mid noqon karaan basle aan ku xadadnayn, kuso rogid cawaaqib taxane ah oo ay ka mid tahay anshax edbin kale. Go'aan ka gaarista jawaabta ku haboon ardayda ku lug leh dabeecada handadaada, maamulaha dugsiga waa inay fiiriyaan noocyada dabeecadaha, inta jeer iyo/ama hanaanka dabeecadaha iyo xaaladaha kale ee la xiriira. Anshaxa edbinta kale waxaa ka mid ah, balse aan xadadnayn:

1. La kulanka ardayga iyo waalidka/mas'uulka ardayga;
2. Howlaha dib u milicsiga, sida in ardayga lagu kalifo inuu soo sameeyo qoraal quseeya akhlaaqxumadiisa;
3. Dexdhaxaadin, laakin waa marka khilaaf ka dhaxeeya laba dhinac oo iskufil ah inta ay ahaan laheyd dabceecad xun oo hal dhinac ah iyo waliba in labada dhinac si iskaa ah u doortan dooqan;
4. La talin;
5. Maareynta carada;
6. La talin caafimaad ama faragelin;
7. La talin caafimaad dhanka maskaxda;
8. Ka qayb qaadashada howlaha xirfad dhiska iyo xalinta, sida dhisidda xirfadaha garashada dareenka bulshada, fadhiyada xallinta iyo shirarka heshiis soo celinta;
9. Adeega bulshada; iyo
10. Ku haynta dugsiga dhexdiisa ama ganaax, taas oo dhacayso xiliga qadada ama dugsiga marka la ruwaaxayo ama maalmaha fasaxa.

C. Dib u dhexdhexaadin dhacdo walbo oo handad ah oo lataaban karo si loo hakiyo saamaynta handadaada lana dhimo halista dhacdooyinka handadaada mustaqbalka kuwasoo ay mid tahay soo gudbinta dhibanaha, dembiilaha iyo shaqsiyaadka kale oo lug leh si loo siiyo la talin ama adeegyada haboon.

## **VIII. Racfaan**

Ogeysiin racfaan ka qadasho ayaa la siin doona waalidka, mas'uulka ardayga iyo ardayga inay qaatan ama aysan qaadan go'aanka maamulaha ama kan shaqaalaha kormeeraha dugsiga u xil saaray xal raadinta sida waafaqsan qaanuunkan. Nidaamka racfaanka waa inuu waafaqsanyahay nidaamyada racfaanada kale ee ay dejiyeen guddiga dugsiga waxaana ka mid noqon kara racfaan weydiisashadda kormeeraha dugsiga.

## **IX. Sida Mas'uuliyada loo kala Leeyhay**

### **A. Guddiga dugsiga waxay mas'uul ka yihiin:**

1. Inay sanad walbo bixiyaan qaanuunkan oo qoraal ah iyo nidaaminta la xiriirta ardayda, waalidka iyo mas'uuliyiinta, dadka iskood u shaqeeya, maamulayaasha, macalimiinta iyo shaqalaha dugsiga;
2. Inay ku daabacaan qaanuunkan iyo nidaamyada la xiriira xarunta maamulka dugsiga iyo websayt ay bulshada heli karaan; iyo
3. Inay kusoo daraan buuga gacanta ardayga qeyb si faahfahsan kaga hadleysa qaanuunkan iyo nidaamyada la xiriira.

### **B. Kormeeraha wuxuu mas'uul ka yahay:**

1. Kormeerka, dhaqan gelinta, iyo fulinta qaanuunkan iyo nidaamkiisa;
2. U xil saaridda maamul dugsi ama shaqalaha dugsiga in qaanuunkan dugsiga looga dhaqmo;
3. Samaynta qaab bulshada ku aqoonsato wakiilka kormeeraha ama wakiilka ka fulinaya qaanuunka dugsiga;
4. Hubinta mamnuucidda handaada iyo aargoosiga iyo cawaaqibta lala tiigsanaya ardayga, shaqaalaha dugsiga, qandaraaslaha, martida ama iskii u shaqeeyaha ku lug yeesho dabecadaha horseeda handaada ama aargoosiga;
5. Hubinta qandaraasla walbo, marti walbo, ama iskii u shaqeeya walbo oo ku lug yeehsa handaad in laga xannibo ciida dugsiga ilaa uu ka hubiyo kormeeraha dugsiga inta qofkaas u hagaansamayo qaanuunka guddiga dugsiga;
6. Hubinta hay'ad walbo oo dugsiga xiriir la leh oo fasaxda ama lug ku yeelata handaad ama aargoosi inay lumineyso idinka ay uuga howlgasho ciida dugsiga ama faa'idoonyinka xariir ee ay la leedahay dugsiga;
7. Bixinta xirfada hormareed iyo tabababarka shaqaalaha sida ugu wanaagsan ee loogu hortagi karo handaada iyo faraxumaynta iyo dhaqangelinta qaanuunkan;  
[FIIRO GAAR AH: Sharciga aya qasbaaya "tababar iyo qalab waxbarasho ee la xiriira qaanuunkan" in lagu daabaco websayta Waaxda Waxbarashada. eeg "xog ka hadleysa ka hortaga handaad"  
<http://www.maine.gov/doi/bullying/resources/> wixii war dheeri ah]
8. Buuxinta qaanuunka SAU Waaxda Waxbarashada Maine taasoo ka hadleysa handadka iyo handaada intarneetka;

Waaxda Waxbarashada Gobolka Maine  
Fal lagu Mamnuucayo Handadka iyo Handaaada Intarneetka Dugsiyada Maine  
Model Policy - JICK

9. Hubinta u soo gudbinta Waaxda Waxbarashada gobolka Maine falalka handadka iyo handadaada intarneetka ee la taaban karo ugu yaraan si sanadla ah.

Tixraac sharci: 20-A M.R.S.A. § 254 (11-A)  
20-A M.R.S.A. § 1001(15), 6554  
Maine Public Law, Chapter 659

Cross Reference: AC – Takoora la’aan, Fursad loo Simanyahay  
ACAA – Dhibaateynta iyo Faraxumeenta Galmo ee Ardayda  
ACAA-R – Nidaamka Cabashada Takoorka iyo Faraxumeenta  
Ardayda Nidaamka  
ACAD - Hazing  
AD - Falsafada Aqoonta/Hoowsha  
ADAA - Nidaam Dugsi oo u Hogaasan Xeerarka Dhaqanka Dugsiga  
iyo Anshax Mas’uulnimo  
CHCAA - Buuga Gacanta ee Ardayda  
GCI - Horumarinta Xirfada Shaqaalah  
IJNDB - Isticmaalka Kombuyuutaka iyo Intarneeta iyo Amniga Intarneetka  
JI - Xuquuda Ardayga iyo Mas’uuliyadaha  
JIC - Anshaxa Ardayga  
JICC - Anshaxa Ardayga Goorta Baska Saaranyahay  
JICIA - Hubka, Rabshadaha iyo Amaanka Dugsiga  
JK - Edebta Ardayga  
JKD - Ganaaxa Ardayda  
JKE - Eryidda Ardayda  
JRA-R - Diiwanka Waxbarashada Ardayga iyo Macluumaadka Maamulka  
Nidaamka  
KLG - Xiriirka Maamulka Sharci Fulinta

Adopted: \_\_\_\_\_